Soojeedimo iyo cabashooyin

Waanu qiimaynaa fikirkiina. Fadlan buuxi xogururintayada si aan u sii wadi karno inaanu horumarino adeegyadayada. Waa inaanad magacaaga ku qorin xogururinta.

Haddaad jeceshahay inaad cabasho samayso, la hadal mid ka mida la taliyeyaashayada ama buuxi foom cabasho oo yaala xafiiskayaga.

Soojeedimaha iyo foomamka cabashada ee buuxsan waxa loo gudbin karaa shaqaalahayaga ama sanduuqa soojeedinta xafiiskayaga.

Sidoo kale waxaad u caban kartaa *Xafiiska Wakiilka Haajiridda (OISC):* *http://www.oisc.gov.uk/*

Sidee la noo helaa?



Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, (170 Blythswood Court), Glasgow G2 7PH Tel: 0141 248 9799 Fax:0141 243 2499, **www.scottishrefugeecouncil.org.uk**
Scottish Refugee Council waa hay'ad samofal oo ka sajilan Scotland.
Samofal Sajilan: SC008639 OISC Reference: N2000100084

Sideen kuu caawin karnaa

October 2011

5 Cadogan Square
Glasgow
G2 7PH
Tilifoon: **0800 085 6087** (wicitaanada aan ahayn moobayladi waa bilaash)
Website: www.scottishrefugeecouncil.org.uk

HAPPY TO TRANSLATE

Completed by Scottish Refugee Council adviser:

Your name:

Scottish Refugee Council reference:

NASS or Home Office reference:

Waqtiyada Furista

Isniinta, Salaasa, Khamiista iyo Jimcaha la talinta booqashada kadiska ah ayaa jirta: 9:30-12:30

Isniinta, Salaasada, Arbacada iyo Jimcaha la talinta ballanta leh oo kaliya ayaa jirta 14:00 – 16:00

Yaanu nahay ?

Scottish Refugee Council (Golaha qaxootiga ee Scottish-ka) waa hay'ad xarunteedu tahay dalka Scotland oo dadka magan-gelyo doonka ah ee jooga Scotland siisa talo, macluumaad iyo taageero.

Qayb ka mid ah ma **nihin** xukuumada UK ama Xafiiska Arrimaha Gudaha. Waxaan bixinaa adeeg asturan oo madaxbannaan.

Muhiim: Keen xaashidan, waraaqaha Xafiiska Arrimaha Gudaha (IND) iyo wixii dhokomenti kale ee la xidhiidha kiiskaaga xafiiskayaga. Waxay naga gargaari inaan ku gargaarno.

Sideen kuu caawin karnaa

Waxaanu qiimaynaa kaladuwanaashaha waxaanannu ula dhaqannaa dadka oo dhan si isku mida, ooy ku dheehan tahay qaddarin iyo ixtiraam.

Waxaanu siinaa bee'ad badbaado, taageero iyo soodhawayn leh shaqaalahayaga iyo dadka isticmaalaya adeegyadayada labadaba.

Waxaanu bixinaa la talin iyo macluumaad ku saabsan hannaanka magangalyo-doonka, helidda taageero magangalyo-doon (taageero lacageed iyo hooy), ku noolaashaha Scotland iyo arrimaha kale la xidhiidha. Waxaanu kuu gudbin doonaa hay'adaha kale marka ay kuu caawin karaan ama kuula talin karaan si ka fiican.

Haddaad doorbiddo inaad la hadaho la taliye ama tarjumaan laba ama dheddig ah, waxaanu isku dayi inaan kuu diyaarino tan. **Xafiiskayagu aad ayuu mashquul u noqon karaa, si aan u caawino qof kasta, waxaan u baahanahay inaad nala shaqayso.**

Xusuusnow

- Kuma meteli karno dalabkaaga magangalyada. Si kastaba, waxaan kaa caawin karnaa inaad hesho wakiil sharci oo aqoon leh.
- Kuma siin karno jiif iyo cunto. Laakiin waxaanu kaa caawin doonaa inaad codsato jiif iyo cunto kasta oo aad xaq u leedahay.
- Ma bedeli karno go'aanada Xafiiska Arrimaha Gudaha ama ururo kale

Tarjumaanada

- Waxaanu ka soo horjeednaa adeegsiga asxaabta iyo qoyska tarmaan ahaan.
- Haddii loo baahdo, anagaa buug galinayna tarjumaan lacagtoodana bixinayna.
- Haddaanad iman karin ballantaada, soo wac si aad u buriso. Waxaanu nahay hay'ad samofal oo lacag yar haysata. Haddaad dib u dhacdo ama jarto ballantada, wali waa inaanu lacag siinaa tarjumaanka.
- Haddaad dhib kala kulanto tarjumaanka aanu ku qabano, noo sheeg.

Carruurta

- Xafiiskayaga carruurta waa lagu soo dhaweeyaa laakiin waxa laga yaabaa inay kuu fududahay la hadalka la taliye haddaanay kula joogin.
- Ma xannaanayn karno carruurtaada markaad la taliyaha la kulmayso. Carruurtaada aadaa markasta ka masuula.
- Waxaan leenahay meelo loogu beddelo carruurta xafiiskayaga.

Sida loo isticmaalayo adeegayaga

La talinta booqashada kadiska ah

- Haddaad timaad xafiiskayaga adoon wax ballan ah qoran, waxa dhici karta inaan ku aragno maalintaa hadday **xaalad degdega ah** tahay, laakiin wakhiti dheer ayaad sugi kartaa.
- Kiiska kastaaba waa nooc qaarbaana ka degdeg badan kuwa kale. Tan waxa looga jeedaa in dadka qaar xafiiska aad kahor timid in laga yaabo in lagaa horraysiiyo.
- Waxa dhici karta inaan ballan laguu qaban ama aan lagu aragba – haddaba fadlan isticmaal macluumaadka aan ku siino.

Kalfadhiyada Kooxda Macluumaadka

- Waad ka soo qaybgali kartaa kalfadhiyadayada bilaashka ah ee kooxda macluumaadka ee ku saabsan hannaanka magangalyo-doonka, taageerada la heli karo, xaquuqdaada iyo waxaad mutaysatay waxaanad baran sida loo helo ama codsado waxyaalahan.
- Kalfadhiyada ujeedadeedu waa in laga jawaabo su'aalaha lana xalliyo dhibaatooyinka; waa inaad ka qaybgashaa kalfadhi kahor intanaan kuu qaban ballan
- La hadal mid ka mida shaqaalahayaga si aad uga qabsato boos kalfadhiga ama wac 0800 085 6087 (waa bilaash marka laga soo Waco laynka, maya moobilka)

Ballamaha

- Waa inaad ballan samaysataa si aad ula hadasho la taliye.
- La hadal khadkayaga la talinta si aad balan u samaysto : **Tel: 0800 085 6087** (wicitaan bilaash wixii aan ahayn moobilada)
- Fadlan dhowr waqtigaaga balanta. Haddii aad habsaanto waxaa dhab ah in aanaan awoodi doonin inaan kula kulano waxaanuna u baahan doonaa inaan maalin kale kula kulano.

Habdhaqanka la qaadan karo

- Waanu fahansanahay sida arrimuhu walaac iyo walbahaar u yeelan karaan. Si kastaba, waa waxaan laga aqbali karin shaqaalahayagu ama macmiilkayagu inuu yeesho habdhaqan handadaad, baqdin galin ama weerar ah.
- Habdhaqanka noocan ahí wuxuu keeni karaa ka joojin xafiiskayaga iyo adeegyadayada ah.